

*Xafiiska Baaraha Caafimaadka Gobolka Ramsey wuxuu siiyaa naxariis iyo faham xubnaha qoyska ee waqtiga qasaarhooda iyaga oo u hogaansan sharciyada gobolka ee la xiriira baaritaanka dhimashooyinka.*

*Gudaha Minnesota, dhammaan dhimashooyinka lama filaanka ah iyo aan la filaneyn, sidoo kale sida dhimashooyinkaas ka dhaceyso sababat aan aheyn dhimashada dabiiciga ah, waa in lagu soo wargeliyaa Xafiiska Baaraha Caafimaadka sida waafaqsan Qaanuunada Gobolka Minnesota 390.11.*

*Haddii aad qabtid su'aalo kale oo aan ku jirin buug-yarahaan fadlan nagala soo xiriir 651-266-1700.*

Xafiiska Baaraha Caafimaadka Gobolka Ramsey wuxuu u adeegaa sida baaraha caafimaadka ee Ramsey, Washington iyo wax ka badan darsan gobolada kale ee ku yaalo Minnesota. Xafiiska sidoo kale wuxuu bixiyaa adeegyada baaritaanka dambiga ee loogu talloagalay baarayaasha geerida, baaraha caafimaadka iyo wakaaladaha fullinta sharciga ee Minnesota iyo Wisconsin oo dhan.

300 University Ave. E.  
Saint Paul, MN 55130  
651-266-1700

[RCMedicalExaminer@ramseycounty.us](mailto:RCMedicalExaminer@ramseycounty.us)

[ramseycounty.us/MedicalExaminer](https://ramseycounty.us/MedicalExaminer)



### **WAXAA AQOONSAN:**

The National Association of Medical Examiners and the International Association of Coroners and Medical Examiners.

RAMSEY COUNTY  
**MEDICAL EXAMINER'S OFFICE**

# **NIDAAMKA BAARITAANKA DHIMASHADA**

Su'aalaha iyo jawaabaha  
la xiriira baaritaanka ee  
dhimashada qaraabada.

## Sidee ayaan u helaa shahaadada dhimashada?

Guriga tacsida ee aad dooratay ayaa caadi ahaan ku siinayo shahaadada dhimashada. Waxaad sidoo kale booqan kartaa Xafiiska Diiwaanada Muhiimka Caafimaadka Bulshada deegaankaaga ama gobolkaaga si aad u buuxisid arji shahaadada dhimashada ah.

## Yaa sameynayo baaritaanka?

Mid ka mid ah 10 baarayaasha waqtiga buuxo ama madaxa baaraha ayaa sameynayo baaritaanka. Shaqaalaha baarayaashaan xafiiska 24 saacadood maalintii, todoba maalin isbuucii. Baarayaasha ayaa usugu keenayo warbixinta qofka dhintay baaraha caafimaadka iyo caawiyaha si ay dib ugu eegaan. Dhammaan shaqaalaha baaraha waxay waqti ku isticmaalaan u shaqeynta sida farsamayaqaanada baarista dambiga oo loo tababaray baaritaanka dhimashada. Waxay ka sharciyeysanyihiin Guddiga Ameerikaanka ee Baarayaasha Dhimashada Medicolegal.

## Miyaa muunooyinka marwalba la sameeyaa?

Maya. Dacwadaha badan muuno looma baahno. Muunada waxay muhiim noqon kartaa halka ay u adeegi karto danaha bulshada oo ugu ogolaato dhinaca baaritaanka dhimashada qofka.

## Goorma ayaa natiijooyinka muunada la helayaa?

Kadib markii muunada la dhameystiro, natiijooyinka waxaa caadi ahaan lagu heli karaa gudaha lix isbuuc. Gudaha xaaladaha halka baaritaanka sheybaarka dheeraadka ah loo baahanyahay, natiijooyinka way dheeran kartaa.

Xubnaha qoyska oo sharci ahaan u qalmo koobiga wargelinta muunada ugu dambeeyso waxay codsan karaan mid iyaga oo kala xiriirayo xafiiskeena 651-266-1700.

## Haddii muunada loo baahanyahay, halkee ayaa lagu sameynayaa?

Dhammaan muunooyinka waxaa lagu sameeyaa Xafiiska Baaraha Caafimaadka Gobolka Ramsey ee ku yaalo 300 University Ave. E, Saint Paul. Goobta xafiiska ku yaalo ee ku xiggo dhismaha Regions Hospital ee magaalada hoose Saint Paul.

## Yaa sameynayo muunada?

Dhammaan muunooyinka waxaa sameeyo dhaqaatiirta sheybaarka dambiga oo ay caawinayaan farsamayaqaanada baarista dambiga ee gudaha Xafiiska Baaraha Caafimaadka. Dhammaan dhaqaatiirta sheybaarka waxaa loo tababaray baaritaanka dambiga oo waxay leeyihiin waaya aragnimo dheeraad ah ee baaritaanka dhimashada.

## Goorma ayaa muunada la sameynayaa?

Inta badan dacwadaha, muunada waxaa la sameynayaa isla maalinta dhimashada qofka la soo wargeliyay. Tani way dheeraan kartaa haddii waqtiga loogu baahan yahay in la geeyo qofka dhintay xafiiska. Dadaal walba waxaa loo sameeyaa in lagu dhameystiro baaritaanka 24 saac gudahood ee dhimashada qofka la soo wargeliyay.

## Miyay dhici kartaa ku deeqida unugyada?

Haa. Jaalalka xafiiskeena iyo Life Source oo ku deeqida unuga. Dadaal walba waxaa loo sameeyaa in lagu qaabilo rabitaanada qofka dhintay iyo xubnaha qoyska.

## Miyaan diidi karaa muunada?

Haa. Haddii aad qabtid su'aalo la xiriiro sababta muunada ah in loo sameeyo ama haddii aad qabtid diidmooyin gaar ah sida ku saleysan aaminaadaha diintaada, fadlan kala xiriir xafiiskeena 651-266-1700 oo weydii inaad la hadashid baaraha. Iyada oo dadaal walba loo sameynayo in lagu qaabilo rabitaanada qoyska, go'aanka ugu dambeeyo wuxuu ku xirnaanayaa waajibaadyada sharciga ee xafiiska iyo sharaxaadaha ee dhimashada taas oo la baaray.